UNIT 1: FAMILY / WEEK 3

# Home Link - Somali




“Home Links” Xirriirinta Guriga Cutubka 1:
Qoysaska: Toddobaadka 3

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan wuxuu ilmahaagu ku baran doonaa wax yaalaha ku saabsan Qoysaska/Reerka. Isku day ugu yaraan saddex ka mid ah waxqabadyadan waxbarashada ee xiisaha leh, amasamee dhamaantood! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato waqtiga yar oo cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midab mari ama calaamaday sanduuqyada waxqabadyada aad dooratid oo ku soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **KU RAAXEYSO!**

Magaca Ilmaha: ________________________________

## Luqadda

(La xiriira *Oonga Boonga, Tito Puente Mambo King*,iyo *Charlie Parker Plays Bebop).* Dhageyso muusikada aad jeceshahay oo kala hadalilmahaaga sida ay ku dareensiineyso. Ku soo dhawey ilmahaaga in uu sawiro inta dhageysiga lagu jiro. Erayada qaar kood oo aad ku isticmaali karto wada-hadalka waxaa ka mid ah: Farxad, xamaasad, murug, xanaaqid, laxan, habeynta laxanka, laxanka xeesta, codadka.

**Lagu bilaawayaasha Wada-hadalka**:

- Muusikadan waxey
- idareensiin_______________(Xamaasad). Sideebay ku dareensiin?
- Ma jeceshahay muusikada dagan ama muusikada dhaqsaha ah? Maxaa yeelay?
- Wax iiga sheeg midabada iyo qaababka aadsawiraysid?

## Wax Akhrinta iyo Qorida/Hees

Wada heesa. Tani waa hees ah in ilmahaagu uuyaqaano.
Hees heestan adiga oo isticmaalaya dhammaanmagacyada xubnaha qoyskaaga/reerkaaga: Fadlan fiiri ama riix xiriiriyahan si aad u heshid laxanka codka:

**Willaby Wallaby**
Willaby Wallaby Wee, an elephant sat on me.
Willaby Wallaby Woo, an elephant sat on me.
Willaby Wallaby W_________(Walim), an
elephantsat on____________(Salim)
Willaby Wallaby W_______,
an elephant sat on

## Wax Ogaanta

**Waqtiga Qubeyska Lagu Jiro:**
Sii ilmahaaga qaar ah weelo cabiradooda ay kala duwan yihiin si uu/ay ugu ciyaaraan oo ku soo dhawey isaga/iyada in ay arkaan dhaqdhaqaaqa iyo codka biyaha. Waa maxay dhawaaqa aad maqasho marka aad biyaha shubi?

**Lagu bilaawayaasha Wada-hadalka:**
Sidee baad biyaha u dareemi marka aad ku shubto farahaaga/madaxaaga/cagahaaga?

## Hadal iyo Akhris Wadajir Ah
(20 daqiiqadood)

- **Lagu bilaawayaasha Wada-hadalka**:
- Waa maxay qeybta sheekada ka mid ahoo aad ugu jeceshahay?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xigaoo dhici doona?

## Xisaabta

Ku soo dhawey ilmahaaga in uusoo uruuriyo 3 illaa 5 waxyaalo yaryar ah oo uuna tiriyo(tusaalo ahaan. dhagaxyada bada, caleemo, daboolada dhalooyinka, qadaadiicda (lacagta birta ah).

**Lagu bilaawayaasha Wada-hadalka:**

- Imisa xabbadood (qadaadiicda/lacagtabirta ah) ayaad soo uruurisay?
- Sidee baad ku ogtahay?

# Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga.
Booqo Maktabada Dadweynaha ee Boston si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan qoysaska/reeraha!

Isniin ____ Talaado ____ Arbaco ____ Khamiis ____ Jimco ____ Sabti ____ Axad ____

Buugaga aan ku akhrino dugsiga

- *Corduroy* qorey Don Freeman
- *Charlie Parker Played Be Bop* qorey Christopher Raschka
- *Tito Puente Mambo King* qorey Monica Brown

Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaaboin aad jeclaataan:

- *A Pocket for Corduroy* qorey Don Freeman

## Talooyin ah akhrinta si wadajir-ka ah:

- Wada fadhiista meel dagan oo xasilan.
- Inta aad akhrinta ku jirtid, muuji oo qeex ama sharax macnaha erayada cusub. Tusaalo ahaan, "Tan **Jaraanjarada-qaada-dadka(escalator)** waa jaraanjarooyin iswata oo dhaqaaqa."
- Inta aad akhrinta ku jirtid, weydii ilmahaaga su'aalo la xiriira ama ku saabsan buuga. Tusaalo ahaan, "Maxaad u maleyneysaa in Lisa ay Corduroy ku sameysay ka dib markii ay dib ugu toshaybadhankiisa/guluuskiisa?"